

Suuxintaada qalliinka wadnaha

Buug-yarahani waxa uu ku siinayaa macluumaadka ku saabsan suuxintaada qalliinka wadnaha (wadnaha) ee dadka waaweyn iyo waxa aad filan karto ka hor, inta lagu jiro iyo ka dib qalliinka.

Kooxda ku jirta rugta qiimaynta hore, dhakhtarkaaga suuxinta iyo dhakhtarkaaga qalliinka ayaa ku siin doona tafaasiil ku saabsan daawayntaada gaarka ah, faa'iidooyinka iyo khataraha.

Waxaa jira macluumaad badan oo la qaadan karo, maadaama qalliinka noocan ahi uu ka adag yahay noocyada kale ee qalliinka. Waa in aad akhrido buug-yarahaan iyo macluumaadka kale ee uu cisbitaalkaagu bixiyo.

Sideen ugu diyaar garoobi karaa qalliinka wadnaha?

Cilmi-baaristu waxay muujisay in bukaannada fayooow ay si dhakhso ah uga soo kabtaan qalliinka. Haddii aadan u baahnayn daaweyn degdeg ah, waa inaad ka fekertaa inaad hagaajiso xaalad kasta oo caafimaad oo jirta oo aad isku daydo inaad sameyso waxa aad awoodid si aad u hesho sida ugu macquulsan qalliinka ka hor. Hoos waxaa ah koobitaanka tillaabooyinka aad qaadi karto si aad u horumariso caafimaadkaaga sidoo kale waxaa jira macluumaad waxtar leh oo ku saabsan u diyaarinta qalliinka oo ku jira qalabkeena Fayooow Wanagsan Si degdeg ah (www.rcoa.ac.uk/fitter-better-sooner).

Sigaarka

Waxaan ognahay in haddii aad sigaar cabto ay aad ugu dhowdahay in ay kugu dhacaan dhibaatooyin qalliinka ka dib. Akhbaarta wanaagsan ayaa ah in joojinta sigaar cabista xitaa waqti yar ka hor qalliinka ay hagaajin karto bogsashada dhaawaca, sambabadaadu si fiican u shaqeeyaan oo ay soo gaabiyo joogitaankaaga isbitaalka. Xarunta GP-gaaga ama Adeegga Joojinta Sigaarka ee deegaankaaga (www.nhs.uk/quit-smoking) ayaa awood u yeelan doona in ay ku caawiyaan dhimista ama joojinta sigaarka, markaa weydii ikhtiyaarka kuugu fiican adiga.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sigaarka iyo qalliinka halkan: Warbixinta ASH: Sigaar cabista iyo qalliinka (www.ash.org.uk).

Khamriga

Khamrigu saameyn badan ayuu ku leeyahay jirka. Waxa ay beerka ka dhigtaa mid aan awoodin in uu ka dhigo dhismooyinka lagama maarmaanka u ah bogsashada. Hubi inaad wax ku cabbayso xadka maalinlaha ah ee lagu taliyay, ama ka hooseeya, si aad u wanaajiso awooda jidhkaaga si uu u bogsado qalliinka ka dib. Waxaad ka heli kartaa macluumaad waxtar leh oo ku saabsan sida loo yareeyo khamriga iyo faa'iidooyinka adiga kugu saabsan Shabakada NHS Caafimaad Wanaagsan (www.nhs.uk/better-health/drink-less).

Cunto

Isku day inaad cunto cunto caafimaad leh si aad ugu diyaargarowdo jidhkaaga soo kabashada qalitaanka ka dib.

Haddii aad cayilan tahay, miisaankaaga oo yaraada waxa ay kaa caawin kartaa in aad tareyso culayska wadnahaaga iyo sambabadaada. Waxa kale oo laga yaabaa inay hoos u dhigto cadaadiska dhiiggaaga, waxay hagaajisaa xakamayntaada sonkorowga, waxay yaraynaysaa halista xinjirowga dhiiggaaga qalliinka ka dib waxayna kaa caawinaysaa inaad si fudud u jimicsato.

Kala hadal GP'gaaga agabka iyo caawinta aad heli karto.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan suuxinta iyo miisaankaaga waxaad ka heli kartaa mareegahayaga (www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali).

Jimicsi samee

Jimicsigu wuxuu kaa caawin karaa inaad u diyaargarowdo wadnahaaga iyo sambabadaada shaqada dheeraadka ah ee ku dhow wakhtiga qalliinka. Fadlan kala hadal GP-gaaga ama takhtarkaaga qalliinka waxa ay kugu badbaado ah inaad sameyso.

Si kastaba ha ahaatee, xitaa haddii lagugula taliyo inaad samayn wax dhaqdhaqaaq jireed oo dheeri ah, qalliinkaagu wali waxaa lagugu siin karaa si badbaado leh.

Xaalado caafimaad oo jira

Haddii aad leedahay xaalado caafimaad oo jira, tusaale ahaan sonkorowga, dhiig karka, neefta ama xaaladaha sambabada kale, ka hubso GP-gaaga ka hor qalliinka in daawadu tahay mid casri ah oo aad qaadato qiyaasta saxda ah. Tani waxay kaa caawin kartaa inaad ka hortagto dib u dhac ku yimaada qalliinka waxayna ku siin kartaa fursada ugu fiican ee qalliinka iyo soo kabashadaada si wanaagsan u socoto.

Haddii aad qabto dhiig-yaraan, waa inaad kala hadashaa GP-gaaga daawaynta si loo hagaajiyo tirada dhiiggaaga qalliinka ka hor. Tani waxay ku siin doontaa tamar badan inta lagu jiro soo kabashadaada waxaana laga yaabaa inay kaa joojiso inaad u baahato dhiig ku shubid.

Haddii aad sonkorow qabto, waa muhiim inaad si fiican u koontaroolto heerarka sonkorta dhiigga. Tani waxay wanaajin doontaa bogsashada nabarrada waxayna kaa dhigi doontaa inaad yareyso inaad qaaddo caabuqyada. La shaqee GP-gaaga iyo kooxdaada sonkorowga si aad isugu daydo in sonkorta dhiigaaga loo xakameeyo sida ugu macquulsan qalliinka ka hor.

Ilkaha iyo ilkaha gacan ku sameyska ah

Haddii aad leedahay wax ilko ah oo dabacsan, fadlan booqo dhakhtarkaaga ilkaha ka hor qalliinka oo qaado wax kasta oo daaweyn ah oo lagama maarmaan ah. Waxaa jirta khatar yar oo ah in ilkaha dabacsan ay dhaawacmaan marka tuubada neefsashada la dhigo inta lagu jiro suuxintaada. Waa muhiim inaad hubiso in ilkahaaga iyo ciridkaagu ay xaaladdoodu wanaagsan tahay oo aanay caabuqin qalliinka ka hor, sababtoo ah tani waxay keeni kartaa in bakteeriyada gasho dhiigga oo ay keento caabuq halis ah, oo loo yaqaanno endocarditis, gudaha wadnaha.

Sidee baa la ii qiimayn doonaa qalliinka ka hor?

Isbitaalada intooda badani waxay leeyihiin rugta qiimaynta qalliinka ka hor (kiliinikada gelitaanka ka hor). Rugtani waxay kuu diyaarinaysaa qalliinka wadnahaaga waxayna qabanqaabinaysaa baaritaan kasta oo looga baahan yahay dhiiggaaga, wadnahaaga, sambabadaada iyo kelyahaaga. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad timaado wax ka badan hal ballan.

Takhtarka suuxinta ama kalkaalisada qalliinka kahor waxay rabi doontaa inay wax ka ogaato caafimaadkaaga guud iyo heerarka dhaqdhaqaaqaaga. Waxay ku weydiin doonaan su'aalo ku saabsan daawooyinka aad qaadato, wixii xasaasiyad ah ee aad qabtid, dhibaatooyinka wadnahaaga, iyo suuxdinta oo laga yaabo inaad hore u lahayd. Waa fikrad wanaagsan in aad soo qaadato liiska dhammaan daawooyinka aad sida caadiga ah u qaadato (waxaad ka heli kartaa koobiga liiskan farmashiistahaaga ama GP-gaaga).

Waxay sidoo kale ku weydiin doonaan wax ku saabsan ilkahaaga, taajajka ama ilkahaaga, iyo haddii aad wax dhibaato ah kala kulanto inaad afka kala qaado ama dhaqdhaqaaqjiso qoortaada.

Kalkaalisada ama takhtarka suuxinta ayaa ku ogeysiin doona sida saxda ah marka aad u baahan tahay inaad joojiso cunista iyo cabbitaanka ka hor qaliinka. Caadiyan, waxaad awoodi doontaa inaad wax cunto ilaa lix saacadood oo aad cabto biyo ilaa laba saacadood ka hor qaliinka, ama wax ka yar xaaladaha qaarkood.

Takhtarka suuxinta ama kalkaalisada ayaa ku siin doona tilmaamo ku saabsan daawooyinka ay tahay inaad qaadato maalinta qalliinka. Kuwaas waxa lagu qaadan karaa kabasho biyo ah isla markaaba wakhtiga qalitaanka haddii lagama maarmaan tahay.

Rugta qiimaynta qalliinka ka hor, waxaad heli doontaa fursad aad ku waydiiso su'aalo kasta oo aad ka hadasho wixii welwel ah ee aad ka qabto qalliinka iyo suuxdinta. Bukaana door firfircoon ka qaata go'aan ka gaarista daaweyntooda waxay leeyihiin qoomamo yar iyo natiijooyin ka wanaagsan qalitaanka ka dib. Waxaad ka heli kartaa wax badan oo ku saabsan go'aan gaarista la wadaago iyo agabka waxtarka leh si aad uga caawiso wada xaajoodyadaada xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ee Xarunta Daryeelka Perioperative website (www.cpoc.org.uk/shared-decision-making).

Maxaa dhacaya wakhtiga hawlgalka dhabta ah?

Takhtarka suuxinta ee ku ilaalin doona ayaa ku soo booqan doona isbitaalka ka hor qaliinka. Isbitaalada qaar, takhtarka suuxinta ayaa laga yaabaa inuu ku siiyo daawada suuxinta kahor suuxintaada si ay kaaga caawiso inaad nasato.

Qaliinka ka hor, waxaa lagu weydiin doonaa inaad isu beddesho gownka tiyaatarka. Kalkaalisadaadu waxay ku dhejin doontaa jijin si ay u xaqiijiso aqoonsigaaga iyo, haddii loo baahdo, wixii xasaasiyad ah. Qalliinnada qaarkood, waxaad xidhi doontaa sharabaadyo cadaadis ah si ay kaaga caawiyaan inaad xinjiro dhiig ku yeelato lugahaaga.

Markaad timaaddo goobta qalliinka, kaaliyaha suuxinta ayaa kula kulmi doona oo hubin doona dhammaan faahfaahintaada. Waxay markaas kugu xirayaan dhowr mashiin (kormeerayaal). Kuwaas waxaa ka mid ah ECG (si loola socdo garaaca wadnahaaga), mashiinka cadaadiska dhiigga, iyo fiilada fartaada ama dhegta si loo cabbiro heerarka ogsijiinta ee dhiiggaaga. Waxaa laga yaabaa in qaar ka mid ah stickers lagu dhejiyo foolkaaga si loo cabbiro sida qoto dheer ee aad u huruddo muddada suuxintaada iyo heerka ogsijiinta maskaxdaada.

Waxaad yeelan doontaa laba ama saddex cannulas (tuubooyinka balaastikada ah ama 'drips') oo la geliyo xididadaada iyo halbowlahaaga. Suuxinta gudaha ayaa kabuubin doonta maqaarkaaga si aysan u dhaawacmin wax ka badan baaritaanka dhiigga caadiga ah. Inta lagu jiro wakhtigan, waxa laga yaabaa in lagu siiyo suuxin si ay kuu dejiso iyo ogsijiin dheeraad ah oo aad neefsato.

Maxaa dhacaya inta uu qaliinka socdo?

Daawooyinka suuxinta ayaa si tartiib ah loogu durayaa mid ka mid ah dhibcaha gacantaada. Marka gebi ahaan lagu suuxiyo, takhtarka suuxinta ayaa afkaaga gelin doona tuubo neefsashada. Mashiinka loo yaqaan hawo-mareenka ayaa markaas ku afuufi doona ogsijiinta sanbabadaada, iyo sidoo kale gaaska suuxinta si uu kuu suuxiyo.

Sidoo kale, ka dib marka lagu suuxiyo, tuubo jilicsan (catheter) ayaa lagu xiri doonaa kaadiheystaada si ay u muujiso inta ay le'eg tahay kaadida kelyahaagu sameeyaan. Marka la suuxiyo waxay sidoo kale saari doonaan tube ultrasound (transoesophageal echocardiogram ama TOE) afkaaga hoos xagga caloosha si ay u siiyaan sawirada wadnahaaga inta lagu jiro qaliinka. Tan waxa laga soo saarayaa ka hor intaadan toosin.

Cannula kale oo ka weyn ayaa la dhigayaa qoortaada ka dib marka lagu suuxiyo (ku seexo daawada suuxinta). Tan waxa loo isticmaalaa in lagu siiyo daawooyin gaar ah waxayna kaa caawin doontaa inaad sheegto sida wanaagsan ee wadnahaagu u bangareynayo. Tan waxaa badanaa la sameeyaa markaad seexato. Haddi takhtarka suuxinta u maleeyo inay jirto baahi loo qabo in la geliyo ka hor inta aan lagu suuxin (iyadoo la isticmaalayo suuxin maxalli ah si uu maqaarka u kabuubiyo), waxay kaala hadli doonaan tan.

Qalliinno badan oo wadnaha ah, qalliin suurtagal maaha haddii wadnuhu garaacayo. Haddii ay tani tahay kiiska qalliinkaaga, kooxdaadu waxay kugu xidhi doontaa bam gaar ah oo loo yaqaan mashiinka wadnaha sambabada (wadnaha-sanbabada). Mashiinkaani wuxuu la wareegayaa shaqada wadnaha wuxuuna ku shubaa dhiiga hareeraha jirkaaga. Waxa kale oo ay ku daraa ogsijiinta dhiiggaaga. Tani waxay la macno tahay in kooxdu ay si badbaado leh u joojin karaan garaaca wadnahaaga qayb ka mid ah qalliinka. Qalliin badan oo wadnaha ah ayaa socda inta u dhaxaysa saddex ilaa shan saacadood. Takhtarkaaga suuxinta iyo farsamayaqaanka ilaalinaya mashiinka dhaafka ayaa si dhow kuu ilaalin doona inta lagu jiro waqtigan.

Waa caadi inaad lumiso xoogaa dhiig ah inta lagu jiro qalliinka wadnaha. Kooxdaadu waxay ku duri doonaan dareere marinka cannulas si ay u beddelaan dhiig kasta oo lumay. Haddii ay suurtagal tahay, waxay ururin doonaan dhiiggaaga iyagoo isticmaalaya mishiin gaar ah (cell saver) oo ay kuugu soo shubaan. Si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inaad u baahato dhiig lagu shubo inta lagu jiro ama ka dib qaliinka. Dhiiga loo isticmaalo ku shubista si taxadar leh ayaa loo eegaa, dhiiga casriga ah ee dhiiga lagu shubana aad buu u badbaado badan yahay. Kuma siin doonaan dhiig ka badan inta aad u baahan tahay si aad u bogsato badbaadadaada. Waxa kale oo laga yaabaa inaad u baahato qaybo kale oo dhiiga ah, sida balasma cusub oo barafaysan ama platelets. Takhtarkaaga suuxinta ayaa waxaas oo dhan kaala hadli doona waxaana laga yaabaa inuu ku weydiiyo inaad saxiixdo foom oggolaansho oo gaar ah.

Maxaa dhacaya qaliinka kadib?

Qalitaanka ka dib, waxa lagu geynayaa qaybta daryeelka gaarka ah (ICU) ama qeybta ku tiirsanaanta sare (HDU). Tani waa sababta oo ah waxaad u baahan doontaa daryeel caafimaad oo heer sare ah iyo qalab gaar ah oo aan lagu siin karin qaybta caadiga ah.

Inta aad ku jirtid ICU ama HDU, garaaca wadnahaaga, cadaadiska dhiigga, neefsashada, iyo shaqada kelyaha ayaa si dhow loola socon doonaa. Kalkaalisadaadu waxay isku hagaajin doontaa dareeraha iyo daawadu si waafaqsan waxaad u baahan tahay.

Waxay ku suuxin doonaan oo ay ku xidhi doonaan hawo-mareenka ilaa ay ka gaadhayso wakhtiga saxda ah ee lagaaga keeni karo suuxinta gabi ahaanba.

Kooxda ICU ayaa markaa ka saari doona tuubadaada neefsashada waxayna ku siin doonaan ogsijiin iyaga oo maaskaro saaraya afkaaga iyo sankaga. Tani waxay badanaa dhacdaa afar ilaa lix saacadood ka dib dhammaadka qalliinka. Waxay noqon kartaa mid ka danbeysa tan (xitaa maalmo) xaalado adag ama haddii aad qabto dhibaatooyin neefsasho. Takhtarkaaga qalliinka iyo suuxinta ayaa kaala hadli doona qalliinka ka hor haddii ay u maleynayaan in tani ay u badan tahay in loo baahdo.

Markaad soo kacdo, wali waxa lagu xidhi doonaa dhammaan dhibicyada iyo kormeerayaasha. Waxa kale oo aad yeelan doontaa hal ama laba tuubbo oo ka soo saara wixii dareere ah ee laabtaada. Waxaa laga yaabaa inay jiraan fiilooyin fiican oo ku dheggan wadnahaaga (filliyada pacing) kuwaas oo takhtarkaaga suuxinta uu isticmaali karo, haddii loo baahdo, si uu u xakameeyo garaaca wadnahaaga. Kuwaas waxaa badanaa lagu hayaa dhowr maalmood. Waxa kale oo laga yaabaa inaad weli haysato kateetarka kaadiheystaada si uu kaaga caawiyo inaad kaadido.

Inta lagu jiro iyo ka dib qalliinka, takhtarka suuxinta ayaa ku siin doona dawooyin xanuun baabi'ye xoog leh iyada oo loo marayo dhibicda si ay kuugu raaxaysato. Marka ay ka soo saaraan xuubabka laabtaada, waxa aad yaraan doontaa inaad u baahato xanuun baabi'iyeyaal xooggan oo waxaad awoodi doontaa inaad kaniini afka ka qaadato.

Kalkaalisadaadu waxay si joogto ah u hubin doontaa heerarka xanuunkaaga. Waa muhiim inaad qaadato xanuun baabi'in kugu filan si aad u awoodo inaad si qoto dheer u neefsato oo aad si fiican u qufacdo. Waa muhiim inaad qufacdo xab-xab si ay sambabadaada si fiican u shaqeeyaan oo ay uga hortagaan infakshanka xabadka. Takhtarka jimicsiga jirka ayaa kuu sharxi doona jimicsiga neefsashada oo ku tusi doona sida saxda ah ee loo qufaco. Takhtarka jimicsiga jirka ayaa kuu sharxi doona jimicsiga neefsashada oo ku tusi doona sida saxda ah ee loo qufaco.

Waa lagu soo booqan karaa intaad ku jirto qybta ICU ama HDU. Kalkaaliyahaaga kaala talinaayo waqtiyada booqashada iyo tirada booqdayaasha la oggol yahay. Sababtoo ah waxaa laga yaabaa in lagugu xanaaneeyo meel ay ku jiraan bukaano aad u xanuunsan, waxaa laga yaabaa inaysan ku habboonayn carruurta yaryar inay soo booqdaan.

Waxa lagu wareejin doonaa qaybta marka aanad u baahnayn dhammaan la socodka iyo daawaynta daryeelka degdega ah. Tani waxay badanaa noqon doontaa laba ama saddex maalmood ka dib qalliinka.

Waxaad kala hadli kartaa dhakhtarkaaga qalliinka inta ay filayaan in soo kabashadaadu qaadan doonto iyo goorta aad awoodid inaad ku noqoto gurigaaga.

Waa maxay khataraha dhibaatooyinka ka imanaya qalliinka wadnaha?

Khatarta dhibaatooyinka inta lagu jiro ama ka dib qalliinkaagu waxay ku xidhan tahay nooca qalliinka wadnaha ee lagugu sameeyay, sida wanaagsan ee wadnuhu u shaqeeyo iyo caafimaadkaaga guud qalliinka ka hor.

Inta lagu jiro suuxinta qalliinka wadnaha

- Waxaa jira khataro ah gelinta khadadka, faleebbooyinka iyo la socodka. Kuwaas waxaa ka mid ah dhiig-baxa, caabuqa iyo dhaawaca xubnaha kale ee jirkaaga ee ay ku dhow yihiin. Khatartaani waa caadi – 100 kii xaaladoodba 1.
- Khatarta dhaawaca hungurigaaga (tuubada cuntada) ee ka timaada tuubada ultrasound ee TOE waa naadir - in ka yar 1 kiis 10,000 kiiba.
- Dhammaan khataraha caadiga ah iyo waxyeellooyinka ka yimaada suuxinta guud waxay sidoo kale khuseeyaan hawlgallada wadnaha:
 - in qofku dareemo xanuun iyo cune xanuun ka dib waa wax caadi ah
 - Khataraha aan caadiga ahayn waxaa ka mid ah dhaawac soo gaara ilkaha, neerfaha iyo indhaha
 - wacyigelintu waa wax aan caadi ahayn inta lagu jiro qalliinka wadnaha - daraasad ballaaran ayaa muujisay khatarta ah in kiis iskiis ah oo wacyigelin ah inta lagu jiro qalliinka wadnaha uu noqdo 1 ee 8,600
 - Dareen-celinta xasaasiyadda ee daawooyinka suuxinta waa dhif.

Warqado ku saabsan khataraha la xariira in lagu sameeyo habka suuxinta ama suuxinta ayaa sidoo kale laga heli karaa websaydka kulliyadda:

www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali.

Inta lagu jiro ka soo kabashada qalliinka wadnaha

Ka soo kabashada qalliinka wadnaha ayaa noqon kara mid aad u adag marka loo eego qalliinnada kale ka dib. Iyadoo ku xiran kiiskaaga gaarka ah, waxaa laga yaabaa inaad u baahato xoogaa daaweyn dheeraad ah, tusaale:

- sambabbadaadu waxa ay u baahan karaan in lagaa caawiyo hawo-qaadista muddo ka badan inta caadiga ah waxaana inta badan lagu suuxin doonaa wakhtigan. Tani aad bay caadi u tahay - ku dhawaad 10kii kiisba 1
- Haddii aad u baahan tahay inaad ku jirto mashiinka neefsashada wax ka badan dhawr maalmood, tuubada neefsashada ee afkaaga waxay u baahan doontaa in loo beddelo 'tracheostomy'. Kani waa tuubo si toos ah ugu sii socota dhinaca hore ee qoortaada una sii socota marinka hawadaada. Tani waa wax caadi ah - 1 ka mid ah 100 kii kiisas. Tuubada tracheostomy si fudud ayaa loo soo saari karaa marka aan loo baahnayn
- Waa caadi in dhiig-bax gudaha ah uu yimaado qalliinka ka dib takhaatiirtaada iyo kalkaaliyayaashaadu si taxadar leh ayay ula socon doonaan. Haddii dhiigbaxu xad dhaaf yahay, Dhakhtarka suuxinta iyo takhtarka qalliinka ayaa laga yaabaa inay go'aansadaan inay dib kuugu celiyaan qolka-qalliinka si loogu sameeyo qalliin dheeraad ah oo lagu joojinayo dhiigga. Tani waa qayb ka mid ah sababta lagu suuxinayo dhawr saacadood ka dib marka qalliinku dhammaado
- saddex ka mid ah tobankii qof ee lagu sameeyo qalliinka wadnaha waxay yeelan doonaan waxoogaa aan caadi ahayn oo ah garaaca wadnaha inta ay ka soo

kabanayaan. Fiilooyinka ku-meel-gaadhka ah ee xawliga ah ayaa badanaa ku dhejiya dhakhtarkaaga qalliinka inta lagu jiro qalliinka si uu u caawiyo wadnahaaga si caadi ah haddii loo baahdo. Tiro yar oo bukaanno ah ayaa u baahan qalab-qaade joogto ah qalliinka ka dib

- waxaa jira halis maskaxdu dhiig ka xirmo qalliinka wadnaha ka dib - iyadoo ku xiran nooca qalliinka, khatartaani waxay u dhexeysaa 3 iyo 5 100 kiisba. maskaxdu dhiig ka xirmo wuxuu sababi karaa dhibaatooyin ku meel gaar ah ama waqti dheer oo saameeya sida aad u dhaqaaqdo, u hadasho iyo sida aad wax u liqo. Mararka qaarkood waxay noqon kartaa dhimasho
- kelyahaagu mararka qaarkood waxay u baahan yihiin caawinaad dheeraad ah si ay si sax ah u shaqeeyaan waxaana laga yaabaa in mashiinka sifaynta lagu nadiifiyo dhiiggaaga qashinka inta ay kelyahaagu soo kabanayaan. Tani waa caadi - qiyaastii 1 kiis 50kii. Dhakhtarka suuxinta ayaa u baahan doona inuu ku shubo faleebo kale oo weyn mid ka mid ah xididdadaada haddii aad tan u baahan tahay
- Wadnahaagu waxa laga yaabaa inuu u baahdo caawimo si uu si fiican dhiigga ugu shubo inta uu ka soo kabanayo. Tani waa caadi - qiyaastii 1 kiis 100kii. Inta badan takhtarka suuxinta ayaa ku siin doona daawooyin si aad tan u sameyso, laakiin marmarka qaarkood bambooyin macmal ah ayaa la isticmaalaa ilaa uu wadnuhu mar kale iskiis u shaqeeyo
- Waxaa jira halis ah in caabuqa gudaha wadnaha haddii lagu xiro mishiinka dhiiga iyo oksijiinka keena inta lagu jiro qalliinka. Khatartu waa naadir – in ka yar 1 5,000 kii kiis.

Kooxdaada qalliinka ayaa kaala hadli doona halista hababkan qalliinka ka hor haddii ay u malaynayaan inaad u baahan tahay. Haddii aad u baahato mid ka mid ah daawayntan dheeraadka ah, halista kugu jirta ayaa inta badan aad uga yar in aad daawato dhibaatooyinka ka imanaya in aanad helin daawaynta.

Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan qalliinka wadnaha iyo dhibaatooyinka suurtagalka ah waxaa laga heli karaa shabakadaha bulshada ee Qalliinka Wadnaha (SCTS) iyo British Heart Foundation (BHF):

- Bukaanka (www.scts.org/patients)
- Daaweynta xaaladaha wadnaha iyo wareegga dhiigga: (www.bhf.org.uk/information-support/treatments)

Dadku way ku kala duwan yihiin sida ay erayada iyo tirooyinka u fasiraan. Miisaankaan waxaa loo bixiyay si uu u caawiyo.



Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Isbitaalada intooda badani waxay soo saaraan waraaqo macluumaad ah oo iyaga u gaar ah oo ku saabsan qalliinka wadnaha qaar badan oo ka mid ahna waxay ka kooban yihiin macluumaad ku saabsan suuxinta.

Waxaad ka heli kartaa waraaqo macluumaad dheeraad ah bogga internetka ee kulliyadda www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali. Waraaqahaasi waxa kale oo laga yaabaa in laga helo waaxda suuxinta ama rugta qiimaynta hore ee cisbitaalkaaga.

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Uma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad kuugu muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yarahaan sidii hagge ahaan. Buug-yarahaan keligiis looma tixgalin doono talo ahaan. looma isticmaali karo ganacsi ahaan ujeedo. Qiimayn buuxda, fadlan halkaan riix (www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali).

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (Turjubaanada bilaa xuduudaah') bulshada turjubaanka. tTayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.

Noo sheeg siday kula tahay

Waxaan soo dhawaynaynaa talooyinka lagu hagaajinayo buug-yarahan.

Haddii aad hayso wax faallooyin ah, fadlan iimayl ugu soo dir: patientinformation@rcoa.ac.uk

Royal College of Anaesthetists

Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG
020 7092 1500

www.rcoa.ac.uk

Daabacaadda Labaad, Abriil 2022

Warqadan waxaa dib loo eegi doonaa saddex sano gudahood laga bilaabo taariikhda la daabacay.

© 2022 Royal College of Anaesthetists

Xaashidan waxa laga yaabaa in la koobiyeeyi doono ujeedada soo saarista agabka macluumaadka bukaanka. Fadlan xigasho asalka ah sii. Haddii aad rabto inaad qayb ka mid ah buug-yarahaan ku isticmaasho daabacaad kale, waa in la bixiyaa qirasho ku habboon oo laga saaro calaamadaha, astaanta iyo sawirrada. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan nala soo xiriir.